**Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka**
*Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya*

# Shaacinta jagooyinka bannaan ee Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka

## Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka

Gudigga oo fulinaya waajibaadka loo igmaday sida uu qeexayo sharciga Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka ee la meel mariyey 2016kii. Gudiggu wuxuu dabagal baaritaanno, cilmi baaris iyo talo bixin ku samaynayaa arrimaha Xuquuqul Insaanka, waxaanu soo saarayaa oo uu xukumayaa shaqsiyaadka loo geysta gaboodfallada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha. Hay'adani waxay soo bandhigaysaa, horumarinaysaa, dabogalaysaa isla markaana difaacaysaa tix gelinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya. Hadafku waa in qaaraan lagu darsado bulshada Soomaaliyeed sidii loogu dammaanad qaadi lahaa qof kasta oo ka mid ah xuquuqdiisa aadaminimo xuduudka Soomaaliya gudaheeda, iyo sidii loo hubin lahaa in dadka Soomaaliyeed aan la liiddin, takoor lagu sameyn naceybna aan la tusin haddii ay u baahdaan inay nafohooga horumariyaan. Xubnaha guddiga masuuliyaddooda waa inay hubiyaan oo ay dabogalaan inay si habsami leh u socoto shaqadii loo igmaday ee uu u diray gudoomiyaha guddigu. Shaqada guddigu waxay ku dhisan tahay iskaashi, waana masuuliyadooda qaabka ay u tayeynayaan ama ay u horumarinayaan hirgelinta waajibaadka sharci ee loo igmaday.

### Warbixinta oo kooban

Dhismaha Hay'adda Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka (GMBXI) ee Soomaaliya waxay ka mid tahay waxyaabaha mudnaanta uu siiyay Dastuurka KMG ka ah waxayna ku qeexan tahay Qodobka 135 (2) (c). Sidoo kale, dastuurku wuxuu ku caddeynayaa Qodobka 41(1) in; ***"Baarlamaanka Federaalka ah uu dhiso Guddi Xuquuqda Aadanaha u qaybsan oo ka madax bannaan maamulka Dawladda, lehna ilo dhaqaale oo uu si habsami leh ugu fuliyo hawlihiisa".*** Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanku waxay noqonayaan kuwo si dastuuri ah u haysta waajibaad sharci oo ay ku difaacaan korna ugu qaadaan xuquuqul insaanka. Waxay guddigani

noqonaysaa xeer beegti si loo difaaco xuquuqul insaanka Soomaaliya. Talooyinkii ku qornaa Dib u eegidda Caalamiga ah ee 2012kii iyo 2016kii, oo ay Soomaaliya ku soo bandhigtay ballanqaadyo, ayaa sidoo kale dhowr jeer hoosta ka xarriiqday baahida loo qabo in la dhiso GMBXI[1]. Laga soo billaabo Bishii September 2012ka, waxaa si joogto ah loo ballan qaadayay dhismaha GMBXI si waafaqsan sharciga.

## Guddiga Ku Meel Gaarka ah ee Soo Xulidda

Hawsha ugu weyn ee Guddiga KMG ee soo xulidda, oo ay soo magacaabeen hay'ado kala duwan sida ku cad Qodobka 15 (i) ilaa (vii), iyadoo lala kaashanayo Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, ayaa waxay xuli doonaan xubnaha gudiddan sida ku xusan Qodobka 8aad ee Hindise Sharciyeedka Dhisidda Guddiga Xuuqul Insaanka. Wasaaradda oo la tashanaysa maamul goboleedyada ayaa waxay magacaabaysaa 19ka xubnood oo sumcad sare leh isla markaana ballan adag ku qaada inay ka qeyb qaataan hababka guddiga.

## Waajibaadka iyo Howlaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka

Sharciga guddiga xuquuqul insaanku wuxu qorayaa waajibaadka iyo hawlaha guddiga. Kuwaas oo kala ah:

1. Horumarinta iyo kor u qaadidda dhaqan ku saleysan aqoonta iyo xurmeynta qiyaamka Xuquuqul Insaanka ee waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka Federaalka iyo Xeerararka Caalamiga ee Xuquuqul insaanka ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay;

2. In uu sugo dhammaan Nidaamyada siyaasadeed ee Dowladda iyo shuruucda ay waafaqsan yihiin mabaa'diida Xuquuqul Aadanaha ee ku xeeran Dastuurka Federaal iyo qiyaamka Heshiisyada iyo Shuruucda Caalamiga ah;

3. Waxa uu gudigu soo booqanayaa xarumaha maxaabiista sida sharciga ah ku xukuman, meelaha lagu hayo dadka aan weli la maxkamadeyn iyo meelaha kale ee laga shakisan yahay in si sharci darro ah dad ugu xiran yihiin iyadoo kormeeradaasi looga gol leeyahay in lagu qiimeeyo hadba talada habboon ay ka soo bixiyaan xaaladaha maxaabiista iyo laheystayaasha ay ku sugan yihiin;

4. In uu qabto cabashooyinka ku saabsan ku xad gudubka xuquuqal insaanka islamarkaana ku sameeyo baaritaan hay'adaha xadgudbay ha ahaadeen hay'adaha Dowladda guud ahaan iyo kuwa Xukuumadda hoos taga ama kuwa gaar ahaaneed, ka dibna ay soo saaran xalka ku habboon ee lagu saxayo xadgudubyada la xiqiijiyey;

5. In uu baaro Xadgudubyada lagula kaco kooxaha nugul oo ay ka mid yihiin Haweenka, dadka taagta daran, dadka baahida gaar ah qaba (Naafada), Waayeelka, Caruurta guud ahaan, iyo kuwa lagu biiriyey kooxaha hubeysan gaar ahaan;

6. In uu sameeyo baaris guud si ay ugu kuur galaan xadgudubyada Xuquuqal Insaanka;

7. In uu diyaariyo warbixinno una gudbiyo Baarlamaanka, Ururrada Xuquuqul Aadanaha ee Gobolka, kuwa Caalamiga iyo hay'adaha arrimaha Xuquuqul Insaanka iyo ciddii kale ee ay khusayso.

8. In uu hormariyo kuna dhiirrigeliyo hay'adaha Dowladda iyo kuwo gaarka ahba ilaalinta, dhowrista iyo ku dhaqanka mabaa'diidda aasaasiga ah ee Xuquuqul Insaanka;

9. In uu kaashado lana xiriirro ururrada ku lug leh ilaalinta iyo difaaca Xuquuqul Insaanka;

10. In uu qabto wixii howl kale ah ee uu Guddigu u arko in aan looga maarmin horumarinta iyo ilaalinta xuquuqul insaanka, si waafaqsan Dastuurka Federaalka; iyo

11. In uu fuliyo xilal kasta oo kale ee Dastuurka Federaalka ama Shuruucda Dalka u xilsaaraan iyo inuu qaado hadba tallaabada habboon ee lagu hormarinayo ilaalinta, dhiirrigelinta iyo ku dhaqanka mabaa'diida iyo qiyamka Xuquuqul Aadanaha.

Gudiggani waxay u wada shaqeyn doonaan si koox ah si ay u hubiyaan in la gaadhay waajibaadkii loo xilsaaray.

**Aqoonta iyo waayo aragnimada shaqo**

Guddigu waxay ka soo xiganayaan awoodohooga sharciga iyo khibraddooda iyo waliba awoodda ay ku hawlgalinayaan ama ku siinayaan awood kuwo kale si loo gaaro waajibaadka saaran. Kuwan soo socdaa waa aqoonta iyo waayo aragnimada loo bahan yahay:

- ☐ Aqoonta arrimaha xuquuqda aadanaha iyo aqoonta aasaasiga ee shuruucda caalamiga ah ee xuquuqul insaanka Soomaaliya;
- ☐ Aqoonta fulinta siyaasadda dowladda iyo sharciyada dalka;
- ☐ Fahanka dhaqan dhaqaale, arrimaha maamulka siyaasadda iyo horumarkooda;
- ☐ Waayo aragnimada khuseysa danaha iskasoo horjeeda iyo saameynta arrimaha jihaysan ee daneeyayaasha;
- ☐ Aqoonta iyo waayo aragnimada horumarinta heerka sare ee siyaasadda

iyo saameynteeda;
- ☐ Qiimeynta iyo u bareeridda khatarta meelaha ay lagama maarmaanka tahay;
- ☐ Waayo aragnimadda cilmibaadhista iyo xog ururinta.

**Kartida**

Nooca ururka iyo dabeecadaha shaqsiyaadka ku jira iyo tayadooda waxay mudan yihiin tixgelin gaar ah, taasoo ina tusaysa kartidooda. Kartiyaha loo baahan yahay waxa lagu qeexayaa sidan soo socota:

- ☐ Sharafta Xukunka madaxa bannaan;
- ☐ Xukunka hadafka leh iyo go'aan qaadashada;
- ☐ Awoodda uu isku hortaagi karo/karto cadaadiska siyaasadeed iyo midka bulshoba;
- ☐ Qancin kara, doodaha iyo eedaymaha adag ee ay kala imanayaan khabiirrada;
- ☐ Heerka awoodeed ee uu qofku leeyahay.

**Waxyaabaha loo baahan yahay**

- Inay dhalashadiisu tahay Soomaali. (ku lifaaq arjiga pasaport, aqoonsi heer Federaal and Dowlad Goboleed ama shahaadada dhalashada);
- Shahaado jaamacad la aqoonsan yahay;
- Ugu yaraan 10 sano oo waayo aragnimo shaqo ah hadii uu qofku haysto/haysato shahaado jaamacadeed ama 15 sano oo waayo aragnimo ah haddii uu qofku bilaa shahaadad yahay.

**Habka**

- ☐ Marka la ururiyo araajida codsiga ka dib, guddiga ku meel gaarka ah ee xulistu waxay bilaabayaan inay dib u eegaan oo ay u sameeyaan habka liiska gaaban;
- ☐ Guddiga xulista waxay ku soo saarayaan liiska gaaban ee musharrixiinta u qalanta ee buuxisa shuruudaha ku qoran sharciga;
- ☐ Musharrixiinta ku soo baxda liiska gaaban waxay guddiga xulista la yeelanayaan waraysi;
- ☐ Guddiga ku meel gaarka ah ee xulistu waxay go'aan ka gaarayaan liiska kama dambeysta ah ee guddiga madaxa banaan ee xuquuqul insaanka, waxana liiska loo dirayaa wasiirka wasaaradda haweenka iyo horumarinta xuquuqul insaanka si ay u hordhigto golaha wasiiradda.
- ☐ Golaha wasiiradu markaa ka dib waxay liiska la isku raaacay u dirayaan golaha shacabka.
- ☐ Ka dib marka ay golaha shacabku ka doodaan liiska ay iskuraacaan ayaa waxa loo dirayaa madaxweynaha dalka si uu ballan uga qaado inay yihiin guddiga xuquuqul insaanka qaran ee dalka.

**Sida loo soo codsanayo**

- Codsaduhu wuxuu kasoo dejisanayaa qaabka arjiga (CV) websiteka wasaarada haweenka iyo horumarinta xuquuqul insaanka ama gudahiisa ayuu arjiga ku buuxinayaa. Fiiro gaar ah: (KALIYA WAXA LA AQBALI KARAA QAABKA ARJIGA KU JIRA WEBSITEKA);
- Arjiga oo ay la socoto warqadda codsigu ayaa lagu soo dirayaa emailka ah **arjiga.gxi@gmail.com** ama waxa arjiga oo waraaaqo ku daabacan gacanta looga dhiibayaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka;
- Warqadda codsiga waa inay ku caddaataa waxa aad ku jeclaatay ama kugu dhiiri geliyay inaad soo codsato guddigan ka mid noqoshadiisa;
- Codsaduhu wuxuu helayaa warqad mahadcelin ah;
- Maalinta ugu dambeysa ee arji qabashadu ay xirmaysaa waa Sebteembar 2da, 2017- 1 da galabnimo (waqtiga Soomaliya).

Ka soo dejiso qaabka arjiga (CV) halkaan http://mwhrd.gov.so/2017/08/03/guddiga-madaxa-bannaan-ee-xuquuqul-insaanka/
Nagala soco cinwaanka Twitterka si aad uga warhayso shaqada Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka (WHHXI):
@MwomentHRD
@MinisterWHRD